Mansoor Area Hargeisa Somaliland
Tel +252 (0) 633 751063
+252 279 940 957
+252 2572442

P.O. Box 691 - 00621 Nairobi Kenya
Tel +254 (0) 204 180 222
+254 (0) 713 773 420
+254 (0) 738 061 687
info@thehorizoninstitute.org www.thehorizoninstitute.org

# Qoraal kooban oo ku saabsan Wakiilka Sharciga Madaxabannaan (WSHM) ee matalaya Dhibbaneyaasha loo geysto Xadgudubyada ku salaysan Galmada iyo Jinsiga

## 1. Hordhac

Ka qaybqaadashada Dhibbaneyaasha loo geysto Xadgudubyada ku salaysan Galmada iyo Jinsiga (DHXGJ) ee raadinaya xuquuqdoodu waxa ay muhiim u tahay dacwad oogista. WSHM-du waxa ay caawiyaan DHXGJ iyaga oo xaqiijinaya in warbixin kasta oo ku saabsan fal-danbiyeedka la xidhiidha galmada in si adag looga hawlgalo laga billaabo marka warbixinta la soo gudbiyo; dhibbanaha in loola dhaqmo qaab la ilaalinayo sharaftooda; iyo in baadhista iyo xeer ilaalintu ay tixgelin siiyaan baahida dhibbanaha. Waddamo badan oo Yurub ka mid ah xeerarkooda madaniga ahi Dhibbaneyaasha loo geysto Xadgudubyada ku salaysan Galmada iyo Jinsiga waxa ay u fidiyaan WSHM. Xeerarkan, wakiilladani waxa ay u dhaqmaan sida Garyaqaannada, dawladda ayaana lacagtooda bixisa.

Waddamada ku hadla Af-Ingiriisiga xeerkooda guud si dhammaystiran umay hirgelin fikradda WSHM, laakiin waxa ay bixiyaan qaabab kale oo taageero ah, sida daryeelka caafimaadka, la talin, iyo taageero niyad-u-dhisid ah.

Tusaale ahaan USA iyo UK, wakiilka madaxa bannaan ee aan sharciga ahayni waxa uu dhibbaneyaasha u fidiyaa talobixin inta kiiskoodu socdo oo dhan.

## 2. Faa'iidooyinka WSHM

Cilmibaadhis lagu sameeyey xeerarka madaniga ah waxaa la helay caddayn muujinaysa in WSHM ay faa'iidooyin muhiim ah u fidiyaan DHXGJ. Tusaale ahaan, haweenka hela WSHM ee DHXGJ kiisaskooda waxa ay u soo gudbiyaan iyaga oo haysta kalsooni badan isla markaa ay yartahay cabsida ay ka qabaan garyaqaanka difaaca.

Guud ahaan, waxa ay dareemaan in aan la faquuqin iyo ay heli karaan xog badan oo ku saabsan kiiskooda iyo in ay fikirkooda ka dhiiban karaan go'aannada saameynta ku leh baadhitaanka iyo dacwad oogista kiiskooda. Arrimahan soo socdaa waxa ay qeexayaan doorarka kala duwan ee WSHM.

## 3. Doorka WSHM ee marxaladda warbixinta la soo gudbinayo

WSHM wuu caawin karaa dhibbanaha marka lagu guda jiro marxaladda la soo gudbinayo warbixinta kiiska (tusaale ahaan waddamada Begium, France iyo Denmark). WSHM waxaa kharashkiisa bixisa dawladda (sida Belgium iyo Denmark) ama dhibbanaha ayaa masuul ka noqonaya kharashka (sida France). Gaar ahaan, Denmark, dhibbanaha waa in loo sheegaa

xaqa ay u leedahay in ay hesho WSHM kadib marka ay warbixinteeda soo gudbiso iyo ka hor inta ayna boolisku su'aalo weydiinin.

4. **Doorka WSHM ka hor inta aan xukunka la ridin iyo inta lagu guda jiro dhageysiga dacwadda**

Xeerarka qaar, dhibbanuhu waxa uu xaq u leeyahay WSHM kaliya marka lagu guda jiro dhageysiga dacwadda haddii ay kiiska ku soo biirto iyada oo ah qof madaxbannaan (sida Belgium iyo France). Xaaladahan, WSHM waxa uu noqon karaa garyaqaan ay dhibbanuhu soo dooranayso haddii ayna xaq u lahayn in ay hesho gargaarka sharciga ah ee bilaashka ah (sida Belgium) ama wakiilku waxa uu noqon karaa garyaqaan aan khibrad badan lahayn oo kharashkiisa ay dawladdu bixinayso (sida France).

France iyo Belgium labadaba, WSHM waxa uu xaq u leeyahay in uu helo dhammaan caddaymaha inta lagu guda jiro dhageysiga dacwadda, in uu goobjoog noqdo inta xukunku socdo oo dhan, in uu la hadlo markhaatiyaasha, in uu ka horjoogsado su'aalaha la weydiinayo dhibbanaha, su'aalo weydiin karo eedaysanaha isdifaacaya, qiraal sameyn karo iyo in uu maxkamadda u sheegi karo haddii eedaysanuhu danbiile yahay ama bilaa danbi yahay.

Denmark, WSHM waa garyaqaan ay dawladdu kharashkiisa bixiso kaas oo ka qaybqaata dhageysiga dacwaddu in ay socoto iyo inta ka horraysa dhageysiga. Dawladda waxaa dhici karta in ay khasab ka dhigto WSHM xataa haddii dhibbanuhu ayna codsanin. Hasayeeshee, WSHM ee ay dawladdu kharashkiisa bixisaa su'aalo ma weydiiyo eedaysanaha ama ma sameeyo qiraal maxkamadda horteeda, laakiin waxa uu u hadli karaa dhibbanaha waxaana sidoo kale uu ka hor istaagi karaa su'aalo la weydiin lahaa dhibbanaha.

Madasha ugu xooggan ee loo fidiyo dhibbanaha waxaa bixiya nidaamka Jarmalka ee WSHM. Dhibbanaha waxaa loo magacaabi karaa WSHM inta lagu guda jiro dhageysiga dacwadda iyo dhageysiga hortiiba. WSHM waxa uu leeyahay xuquuq la mid ah xeer illaalinta iyo garyaqaanka difaaca, waxa uu heli karaa caddaymaha (oo ay kamid tahay baadhista iyo su'aalaha la weydiinayo markhaatiyaasha), waxa uu goob joog ka noqonayaa dhammaan inta lagu guda jiro dacwadda, waxa uu matelayaa dhibbanaha marka xukunka la ridayo, waxaana uu maxkamadda u sheegayaa xukunka iyo magdhawga dhibbanaha.

Ireland waa waddanka kaliya ee waddamada Af-Ingiriisiga ku hadla ee u oggolaada DHXGJ in ay helaan WSHM kaas oo ah garyaqaan. Hasayeeshee, Ireland ma bixiso kharashka WSHM sidoo kale awooddoodu way kooban tahay, waxa kaliya oo loo oggol yahay in ay ka hor iman karaan codsiyada hordhaca caddaynta taariikhdii galmada ee ka hor xukunka inta aan la ridin iyo inta lagu guda jiro dhageysiga xukunka.

5. **Qareen gaar ah oo u dooda carruurta (USA)**

USA waxa ay u oggoshahay carruurta lagu xadgudbo iyo kuwa la xaqduudsiiyo – kuwaas oo intooda badani ay yihiin DHXGJ – in ay helaan wakiillo madaxbannaan oo u raaca maxkamadda isla markaa u fidiya taageero sharci inta lagu guda jiro hannaanka maxkamadda. Wakiilladan iyo kharashkooda waxaa maamula Garyaqaano Gaar ah oo ay Maxkamaddu Magacawdo oo matela carruurta, waa barnaamij isku xidhan oo bulshadu iska leedahay oo shaqaalaysiiya, tababara isla markaana taageera muwaadiniinta ku tabaruca in ay u doodaan danaha carruurta lagu xadgudbo iyo kuwa la xaqduudsiiyo ee maxkamadda horteeda iyo bulshada dhexdeedaba.

Garyaqaannada Gaarka ah ee ay Maxkamaddu Magacawdaa waxa ay xidhiidh rasmi ah la leeyihiin maxkamadaha sidoo kale dadka ku tabaruca in ay u doodaan danaha carruurta waxaa magacaaba xaakinka si korka uu ugala socdo isla markaa uu u doodo danaha carruurta lagu xadgudbiyo iyo kuwa la xaqduudsiiyo. Inta badan waxaa loo igmadaa hawshan kiisaska culculus maaddaama dadka iskood isku xilqaamayaa ay aad u kooban yihiin. Dadkan iskood isku xilqaamay waxaa la mariyaa baadhitaan xooggan iyo tababar, waxaa laga rabaa in ay bartaan nidaamka sharciga, waxaana waajib ku ah in ay bartaan aqoonsiga calaamadaha jidhka ka muuqda iyo kuwa dareenka laga dheehan karo ee la xidhidha xadgudubka galmada ama kuwa ka muuqda dadka la xaqduudsiiyo. Qofkan iskii isku xilqaamay waxaa loo igmadaa hawshan ilaa kiiska la xidhayo, iyo ilaa ilmaha yar la geynayo goob ammaan ah iyo guri rasmi ah.

Waxa ay ka qaybgalaan dhammaan dhageysiga maxkamadda, korka ayay kala socdaan hannaanku sida uu u socdo, sidoo kale taageero nafsaani ah ayay u fidiyaan dhibbanaha.

## 6. Kalkaaliyeeyaasha aan lahayn Tababar Sharci (UK)

UK waxa ay hirgelisay barnaamij dadka waaweyn ee ah DHXGJ u fidiya wakiillo madaxbannaan oo aan ahayn kuwo sharci ah, qaabka ay u dhaqmaana ay tahay Lataliyeyaal Madaxbannaan oo ku saabsan Xadgudubyada Galmada. Lataliyeyaashani waa kalkaaliyeyaal loo tababaray in ay taageero iyo talobixin u fidiyaan DHXGJ si ay u xaqiijiyaan in dhibbaneyaashaasi ay helaan talo, dejin iyo adeegyada kale ee ay xaqa u leeyihiin. Sidoo kale waxa ay dhibbaneyaasha kala taliyaan habka ay warbixinta ugu gudbinayaan booliska iyo sidii kiiska loogu gudbin lahaa hannaanka caddaaladda fal-danbiyeedka. Qayb ahaan kharashka la taliyeyaashan waxaa bixisa dawladda balse waxa ay ku dhexjiraan Xarrunta loo Gudbiyo Xadgudubyada Galmada.

## 7. Gunnaanad

Ka qaybgalka dhibbaneyaasha ee kiiskooda gaar ahaan waxa uu ahmiyad u leeyahay marxaladda warbixinta la gudbinayo si looga hortago eexda shakhsiga ah ama ta hay'adda ee ka dhanka ah dhibbanaha. Sidoo kale waxa ay dhibbanaha siinaysaa sifo sharci ah iyo awood oo uu ka hadli karo maxkamadda horteeda. Hasayeeshee, ilaa WSHM-i uu yahay mid kharashkiisa dawladdu bixiso, qaali ayay ku noqonaysaa dhibbanaha. Xeerarka qaar, xaqa in aad heshid WSHM waxa ay ku xidhan tahay oo kaliya marka dhibbanuhu si madaxbannaan qayb uga ahaanayo kiiska, taas oo inta badan aan u cuntamin dhibbaneyaasha.

Si kastaba ha ahaatee, WSHM door muhiim ah ayuu ka ciyaari karaa marka lagu jiro dhageysiga dacwadda waxaanuu qaadan karaa tallaabooyin uu ku difaacayo dhibbanaha, sida in caddaynteeda meel gaar ah lagu weydiiyo ama in su'aalo la weydiiyo iyada oo aan eedaysanuhu goobta joogin. Xataa goobaha WSHM aanuu lahayn awoodo badan, waxa ay haddana awood u leeyihiin in ay talo siiyaan dhibbanaha isla markaa difaacaan danaha dhibbanaha inta lagu jiro dhageysiga dacwadda.

Halka adeegsiga garyaqaannada aan khibradda badan lahayn (sida France) laga yaabo in ay saameyn ku yeelato tayada wakiillada dhibbaneyaasha mataleya,  tani waa hannaan ay qaadan karaan wadammada aan kharash badan u haynin hannaanka caddaaladda.

Sidoo kale, marka kharashku yaryahay, bar-bilaw waxaa noqon kara in WSHM-du ay taageero u fidiyaan oo kaliya carruurta DHXGJ, sida kuwa Maraykanka ee Garyaqaannada Gaarka ah ee ay Maxkamaddu Magacawdo.

Nidaamyada Garyaqaannada Gaarka ah ee Maxkamaddu Magacawdu iyo Lataliyeyaasha Madaxabannaan ee Xadgudubyada Galmadu waxa ay dhibbaneyaasha u fidiyaan taageero ficil iyo mid nafsi ah. Hasayeeshee, nidaamka Lataliyeyaasha Madaxabannaan ee Xadgudubyada Galmadu waa ka ugu habboon hannaanka WSHM ee hannaanka xeerka guud maaddaama ay taageero u fidinayso dhibbaneyaasha inta lagu guda jiro hannaanka sharciga oo dhan, waxa ay awood gaar ah siinaysaa dhibbaneyaasha DHXGJ waxayna ku jiraan kaalin ay matali karaan dhinacyo badan.